COLUMBUS CITY SCHOOLS BOARD OF EDUCATION
Christina Vera, President • Dr. Tina Pierce, Vice President
Jennifer Adair • Michael Cole • Sarah Ingles
Ramona R. Reyes • Brandon Simmons

17-ka Diseembar, 2024

Bulshada Qaaliga ah ee  Dugsiyada Magaalada Columbus,

Waxaan rabaa inaan shakhsi ahaan aad ugu mahadnaqo dulqaadkaaga aan la soo koobi karin, dadaalkaaga, iyo taageerada hagar la'aanta ah marka aan u socono nidaamka adag ee xiritaanka dugsiga iyo isku xirnaanta xoojinta si aan si wanagsan isu waafajino oo aan u xoojino bulshooyinka dugsiyadeena.

Ka dib doodo dhaa-dheer oo fikr maskaxeed leh oo ku saabsan mustaqbalka xarumaha dugsiyadeena, Guddida waxbarashadu waxa ay gaareen go'aan muhiim ah si ay u ansixiyaan dhawr ka mid ah xiritaanka dhismaha dugsiga iyo talooyinka xoojinta ee ay soo bandhigeen Guddiga Hawl-gelinta Adeegyada Bulshada ee Kormeeraha Guud. Tani waxay ka dhigan tahay in 5 dugsiyada xirmi doonaan ama la isku dari doono, iyada oo hirgelintiisu bilaabanayso horraanta sannad dugsiyeedka 2026-2027.

Dugsiyada uu go'aankani saameeyay waxaa ka mid ah:

- Broadleigh Elementary School
- Buckeye Middle School
- Columbus Alternative High School
- Moler Elementary School
- West Broad Elementary (*Contingent on funded Facility Master Plan moving forward to replace current building)

Go'aankan si fudud looma gaarin, waxaanan si qoto dheer u fahansanahay in dugsiyadu aad bay uga qoto-dheer yihiin dhismayaal. Waa bulsho fir-fircoon oo ay ardaydu ku koraan, saaxiibtinimo ka samaysmaan, mustaqbalkana qaabeeyaan. Waxay yihiin meelo ay ka buuxaan xasuus, fursado, iyo suurto-galnimada wax ka badan oo kale. Anigoo taas aqoonsanaya, Waxaan u wajahnay go'aankaan annagoo go'aansanay inaan ilaalino waaya-aragnimada waxbarasho ee ardaydeena anagoo hubinayna waaritaanka degmada iyo sinnaanta.

Siyaasadda Guddiga ee xiritaanka dugsiga waxay tixgalinaysaa arrimo kala duwan, oo ay ku jiraan isbeddellada is-diiwaangelinta, wax ku oolnimada barnaamijka, awoodda dhismaha, bad-qabka iyo helitaanka, iyo da'da iyo xaaladda xarumaha. Hadda, degmadeenu waxay wajaheysaa caqabado ka haysta dugsiyo ka hooseeya heerii diiwan-gelinta iyo kuwo si xad dhaaf ah u diiwaan-gashan, kaabayaasha gaboowga ah, iyo xarumaha  uu ka sareeyo kharashka ku baxaya dayac-tirka-wax-ku-oolka ah. Arrimahani waxay saameeyaan awooddayada si aan u siino adeegyo taageero waxbarasho joogto ah oo xoog badan arday kasta oo ku nool degmada.

The Columbus City School District does not discriminate based upon sex, race, color, national origin, religion, age, disability, sexual orientation, gender identity/expression, ancestry, familial status or military status with regard to admission, access, treatment or employment. This policy is applicable in all district programs and activities.

COLUMBUS CITY SCHOOLS

Waxaan si aad ah ugu mahadcelineynaa talooyinka iyo jawaab-celinta ay wadaagaan shaqaalaha, ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada inta lagu jiro  hawshan. Cod-dadkiinu waxa ay ahaayeen kuwo lama huraan u ahaa caawinta Guddiga in ay dib u qiimeeyaan oo ay turxaan bixiyaan talooyinka ka soo baxay Guddi Hawleedka, hoos u dhigista baaxada xiritaannada iyo isku xirka markii hore la soo jeediyay.

Toddobaadyada soo socda, waxaa jiri doona fursado joogto ah oo loogu talagalay ra'yi-celinta bulshada inta aan horey u soconno. Laga bilaabo Janaayo, wararka ka imanaya Kormeeraha guud iyo kooxdeeda ayaa la wadaagi doonaa ugu yaraan hal mar bishii inta lagu jiro kulanka labaad ee Guddiga Waxbarashada, iyadoo la hubinayo hufnaanta iyo ka-qaybgalka sii wadida hawshan oo dhan. Intaa waxaa dheer, Dr. Chapman waxay dhisi doontaa koox u xilsaaran kala-guurka si ay u taageeraan ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha marka ay isu diyaarinayaan u gudubka bulshooyinka dugsiga cusub.

Waxaan si buuxda u aqoonsannahay culeyska dareen ee go'aankan iyo saameynta uu ku leeyahay qof kasta oo ku lug leh. Fadlan ogoow in ay naga go'an tahay in aan u wajahno tillaabo kasta oo hawshan ah si dareen leh, naxariis, iyo ixtiraam aan u hayno ardayda, qoysaska, iyo barayaasha ka dhigaya Dugsiyada Magaalada Columbus mid gaar ah. Diiradayadayadu waxay ku taagan tahay abuuristadeegaan bad-qab leh, taageero, iyo horumar dugsi halkaas oo dhammaan ardaydu ay ku gaari karaan awooddooda buuxda.

Marka aan si wada jir ah ugu soconno, aan ku midowno sida ay nooga go'an tahay in aan dhisno mustaqbal ifaya ee hadda iyo kuwa soo socda ee ah ardayda Dugsiyada Magaalada Columbus.

Simahad leh,

Christina Vera



Guddoomiyaha, Guddiga Waxbarashada Columbus

The Columbus City School District does not discriminate based upon sex, race, color, national origin, religion, age, disability, sexual orientation, gender identity/expression, ancestry, familial status or military status with regard to admission, access, treatment or employment. This policy is applicable in all district programs and activities.